WASAARADDA WAXBARASHADA IYO TACLIINTA SARE

IMTIXAANKA FASALKA 4AAD, 2020

# AF-SOOMAALI

2020

XAFIISKA IMTIXAANAADKA PUNTLAND

## WASAARADDA WAXBARASHADA IYO TACLIINTA SARE
## XAFIISKA IMTIXAANAADKA PUNTLAND

Code Number

**IMTIXAANKA FASALKA 4AAD, 2020**
**AMIN: 1 SAAC IYO 30 DAQIIQO**

# AF-SOOMAALI

**TILMAAMAHA IMTIXAANKA**

- Waxaa imtixaanku ka kooban yahay 7 bog
- Tiri bogagga, hadday wax ka maqan yihiin u sheeg ilaaliyaha imtixaanka
- Haku qorin magacaaga iyo Roll lambarkaaga toona warqadda imtixaanka
- Hubi in waraaqda lifaaqu ku dhegen tahay imtixaanka, hadday kaa maqan tahay u sheeg ilaaliyaha imtixaanka.
- Lama ogola waraaqo dheeraad ah
- Jawaabtu hadday kaa qaldanto isku tallaab saar, kadibna qor tan saxda ah.

**Imtixaanku wuxuu ka kooban yahay:**

| QAYBTA | DHIBCAHA |
|---|---|
| Qaybta 1aad: Sheeko | 28 dhibcood |
| Qaybta 2aad: Suugaan | 23 dhibcood |
| Qaybta 3aad: Naxwe | 23 dhibcood |
| Qaybta 4aad: Hiddaha iyo dhaqanka | 26 dhibcood |
| | **Wadarta: 100 Dhibcood** |

---

**Waxaa iska leh saxaha**

| QAYBAHA | DHIBCO |
|---|---|
| QAYBTA 1AAD | |
| QAYBTA 2AAD | |
| QAYBTA 3AAD | |
| QAYBTA 4AAD | |
| WADAR | % |

SOM EXAMS

***Akhri sheekadan kana warceli su'aalaha ka dambeeya***

Waagii hore dadku waxay iskula hadli jireen hadallo **dellegan**,oo sida loo yiri iyo sida ujeedaddoodu tahay aysan is lahayn abwaanimada ku duugan awgeed . Farriimaha iyo dhambaalada ay isku wargelin jireena.Waxaa dhacdey in wiil aabbahiis la heshiin waayey oo **abaabulka** reerka iyo **aqoosha aduunyada** ka dhexeysey ay isku jiireen,iyadoo ay ku wacneyd Odeyga oo nin kulul oo hawl kar ah ahaa iyo wiilkoo aan danneyn jirin **meesinka** la raaciyo iyo masuuliyada reerka uu ku leeyahay. Odeygii waxuu go'aansadey in aaney wadda noolaan Karin wiilkan, waxuu siiyey **jiscin** waxuuna ku yiri:" **Maandhow haddaad ila heshiin weydey iga tag.**"Markaas buu wiilkii ka tegay odeygii.

Saadkii aabbahii soo siiyey wax yar buu magaalada kala soo galey,labo todobaan ka dibna waa ka dhammaadey.Wiilkii inkastuu faro marnaa ,oo habeenno baahi ku seexan jirey,haddana oogadiisa iyo hugiisa midna **uskag** uma ogoleyn. Maxaa yeeley waxaa uu xusuusnaa maahmaahda ah ***"Arrad waa dan Uskagna waa doqonimo".*** Odeygii waxuu maqley in wiilkiisii magaalada aad iyo aad ugu silicsan yahay,wax gargaareyna aaney jirin,markaasuu waa **beer wax dhalaye,** safaro magaalada u baxayey fariin u soo farey oo ku yiri:"Jaalayaalow wiilkaygii igu salaama ,waxuu yahayna iiga soo warama".

Nimankii safaraddu wiilkii fariintii bay **u** sheegeen.Goortaas buu ku yiri: Aabbahay waxaad ku tiraahdaa wiilkaagii waxuu kuu soo farey ***("shanta salaadooda isku weesuu ku tukadaa").***Nimanku ma aysan fahmin oraahda wiilka oo micnaheedu ahaa ***maalintii hal mar baan wax dhadhamiyaa.*** Markii safarkii soo laabtey ayaa odeygii loo sheegey fariintii wiilka isla markiina wuu fahmey aad buuna uga murugoodey dayaca iyo darxumada wiilkiisa haysta . Ayaamo ka dib ayuu safaradii oo magaaladii ku laabanaya waxuu ugu sii dhiibey **Qumbe subag ah iyo kiish ay ku jiraan soddon xabbo oo hilib shiilan ah** waxuuna ku yiri:" igu salaama wiilkeygii waxaadna ku tiraahdaa" **bishu waa sodon balliguna waa buuxaa",** nimankii intii ay jidka ku sii jireen bay qumbihii subaga ahaa raashin ku **iidaanteen** , hilibkiina kow iyo toban cad kala baxeen iyadoo is leh la garan mayo.Goortey magaaladii soo galeen bay wiilkii u geeyeen baaqigii fariintiina u tebiyeen.

Nasiib wanaag wiilku waxuu ahaa nin **xigmad badan oo abwaanimada aabbahiisa ka raacey** isla markiiba wuu fahmey in alaabtu aaney dhammayn, waxuuna ku yiri aabbahay igu salaama una sheega **xagayaga" bishu waa sagaal iyo toban balliguna waa kala bar"**Odeygii wuu ogaadey iney nimanku **tuugo** yihiin waana dacweeyey xaqiisiina ka qaatey.Wiilkiina aabbahiis buu fariin u soo dirsadey isagoo leh "Aabbe **lama huraan waa cawska jiilaale"** waan soo laaban, odeygiina waa uu yeeley.



©PNEB,2020

SOM EXAMS

www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with qalinqaad.com

**QAYBTA 1AAD** **28 DHIBCOOD**

**Akhri sheekadan kore kadibna ka jawaab su'aalaha soo socda:**

**B: Goobo geli xarafka saxda ah** **8 dhibcood**

1. Waagii hore dadku waxay isku la hadli jireen:
   A. Hadallo dheer-dheer
   B. Hadallo hoose
   C. Hadallo dhexdhexaad ah
   D. Hadallo dellegan
2. Dadkii waagii hore badan koodu waxay ahaayeen dad ay ku duugan tahay:
   A. Fulaynimo iyo dadnimo xumo
   B. Aqoon yari iyo doqonimo
   C. Abwaanimo iyo dadnimo
   D. Abwaanimo iyo dul yari
3. Wiilka iyo aabbihii waxay ku heshiin waayeen:
   A. Abaabulka reerka iyo aqoosha aduunyada
   B. Talada iyo Aroorka xoolaha
   C. wardoonka magaalo iyo soofka xoolaha
   D. in la guuro iyo in la negaado
4. Wiilku wuxuu ku wanaagsanaa dhanka:
   A. Caawinta waalidka
   B. Nadaafadda naftiisa
   C. Dhaqidda xoolaha
   D. Wax maqalka waalidka
5. Ereyga "**Jiscin**" waxaa laga wadaa:
   A. Dhar iyo dhogor
   B. Caano iyo Ilays
   C. Cunto iyo Biyo
   D. Xoolo iyo Aqal
6. Odaygii wuxuu waagii dambe maqlay in wiilkiisii magaaladii ku:
   A. Silicsan yahay.
   B. Barbaaray
   C. Dhintay
   D. Aflaxa
7. Odeygu waxuu wiilkiisa u sii dhiibay:
   A. Biyo iyo Caano
   B. Subag iyo Hilib
   C. Bur iyo Saliid
   D. Subag iyo Lacag
8. Odaygu wuxuu waagii dambe ogaaday inay nimanku yihiin:
   A. Niman la isku halayn karo
   B. Niman Wadaado
   C. Niman ammaanad ilaaliya
   D. Niman tuugo ah


©PNEB,2020

SOM EXAMS
www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with qalinqaad.com

**T: Ka warceli weydiimaha Hoose Dhammaantood** **6 dhibcood**

1. Odaygu jiscinka uu wiilka siiyey noloshii safarkiisa ma ku filaatey?

_______________________________________________

2. Wiilku aabbihii ma karaystay?

_______________________________________________

3. Hadduu odaygu markii hore inan ka eryey muxuu ugu soo farey fariinta?

_______________________________________________

4. Maxay nimankii safarradu sameeyeen?

_______________________________________________

5. Sidee bay ugudambayntii, arrintii ku dhammaatay?

_______________________________________________

6. Maxuu wiilku uga jeedey **"Lama huraan waa cawska jiilaal**?

_______________________________________________

**J:Akhri sheekada kore kadibna ku buuxi meelaha bannaan ereyo ku habboon: 10 dhibcood**

1Shanta salaadood isku ____________ku tukadaa.

2. Nasiib wanaag wiilku waxuu ahaa____________________

3. Arrad waa dan uskagna waa________________________

4. Odeygii waxuu ogaadey iney nimanku_________________yihiin.

5. Igu Salaama waxaad ku dhehdaa "bishu waa sodon ____________________.

**X: Sharrax ereyadaan sheekada ku jira... 4 dhibcood**

1. Uskag : ______________________________

2. Dhambaalada ______________________________

3. U tebiyeen ______________________________

4. Aqoosha ______________________________



©PNEB,2020

SOM EXAMS

www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with qalinqaad.com

**QAYBTA 2AAD: SUUGAAN** **23 dhibcood**

**a. Gabay:**

Gabaygan soo socda waxaa tiriyey nin la yiraahdo Cali ma kaadsade, waxana uu tiriyeyey gabayga markii Ingiriisku u ballanqaaday Itoobiya in uu qayb Soomaaliya ka mid siindoono. Ciil iyo caro awgeed waxa uu gabaygiisa tusaale ugu soo qaatay lix waxyaalood oo ay dhibaato soo gaartey, wuxuuna yiri:

1. Sida gaari kii qabey dhintoo galab la sii qaaday
2. Oo gorodda loo suray mid aan gabadhu doonaynin
3. Oo geeridiisii ilmada gabax ka siineysa
4. Gam'i waayey Soomaaliyeey gocashadiiniiye
5. Sida aar gammuun lagu dhiftoo gubayo waabaygu
6. Oon geesta ka arkayn wixii nabarka gaarsiiyey
7. Oo meel gawaana u baxoo mciyihii giijey
8. Gam'I waayey Soomaaliyeey gocashadiiniiye

**Ka warceli weydiimaha gabayga ka yimi** **12 dhibcood**

1. Waa maxay sababta uu abwaanku gabayga u tiriyey?

_______________________________________________

2. Muxuu abwaanku la gam'i waayey oo helay?

_______________________________________________

3. Tuduca 2aad waxaa ku jira nooc kamid ah guurka Soomaalida, haddaba waa kuma noocaasi?

_______________________________________________

4. Maxay ahayd naanaystii uu abwaanku ku caanbaxay?

_______________________________________________



SOM EXAMS
www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with qalinqaad.com

**b. Isku buuxi eraydan iyo macnohooda** **6 dhibcood**

| | | |
|---|---|---|
| Gaari | waabaayo | Gamuun |

1. Oori xilkas ah had iyo goorna nadaafadda ku dedaasha. ____________________
2. Falaar ama leeb mariid leh. ____________________
3. Sun khatar ah oo dhirta laga sameeyo. ____________________

**c. Hees hawleedyo** **5 dhibcood**

Isku aaddi hees hawleedda iyo waxa loogu heeso, adiga oo adeegsanaya erayada shaxda ku jira.

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| Idaha | Lo'da | Fardaha | Riyaha | Geela |

1. ____________ Sange kooraha waa la socodoo waa la saaxiib.
2. ____________ Garooy garoddaa, adna giirooy ka gu'weynide gardarada daa.
3. ____________ Awrka taahiyo, wiilka tiriyiyo, toddobka cirkaa taawushaa sida.
4. ____________ Beyga dhalayoow baaqin maahide barqo soo noqo.
5. ____________ Galaalo ilmaha gosha geliyoo galool u hargee.

**QAYBTA 3AAD: NAXWE** **23 dhibcood**

**a. Ka soo saar midka saxda ah, kuna qor meesha loo banneeyey** **10 dhibcood**

1. Wiil iyo gabar baa is arkay. ***Ka soo saar xiriiriyaha ku jira*** ____________
2. Anigu waan tegey . ***Ka soo saar magac u yaalka*** ____________
3. Wiilku geed ayuu beeray shalay. **ka soo saar falka ku jira** ____________
4. Si deg-deg ah wax u akhri. **Ka soo saar flkaabka ku jira** ____________
5. Waxa orday waa Faarax. ***Ka soo saar magaca gaarka ah*** ____________



©PNEB,2020

SOM EXAMS

www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with qalinqaad.com

**b. Goobo geli jawaabta saxda ah** **3 dhibcood**

1. Magac u yaaladan keebaa ah magac u yaal ebyoon

   A. Aniga

   C. Kayga

   B. Kuwooda

   D. Is

2. Erayadan kuma ayaa fal ah

   A. Cuney

   C. Cunto

   B. Cune

   D. Catir

3. Magaca gaarka ah ee ku jiraa waa kuma?

   A. Dhagax

   C. Xiin-finiin

   B. Dhir

   D. Aragti

**c. Erayada soo socda mid kasta qodob raaci** **10 dhibcood**

a. Bahal ______________

b. Guri ______________

c. Libaax ______________

d. Kabo ______________

e. Habar ______________

**QAYBTA 4AAD: HIDDAHA IYO DHAQANKA** **26 DHIBCOOD**

**a. Goobo geli jawaabta saxda ah** **6 dhibcood**

1. Waa magaca loo yaqaan qofka aan wax bixin

   A. Hanad B. Hanfade C. Dhabcaal

2. Odayaasha xeerarka dhaqanka Soomaalida yaqaan, dadkana ku kala saara; waxaa loo yaqaan:

   A. Xeerbeegti B. Qareen C. Qaaraame

3. Codka fardaha waxaa loo yaqaan

   A. Danan B. Olol C. Banaaxo

4. Wiilka aroosta xoolaha tolku siiyo waxaa la yiraahdaa

   A. Bariido B. Kaalo C. Sooryo



©PNEB,2020

SOM EXAMS

www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with qalinqaad.com

5. Hawraarta tilmaanta waxa lasaluugsan yahay, waxa la yiraahdaa:

   A. Qofayn    B. Buubunis    C. Yamxeeris

6. Erayga qofku caadaysto hadalkiisana uu markasta ku daro waxaa la yiraahdaa:

   A. Hadaaq    B. Halhays    C. Hooris

**b. Isku aadi ereyadaan hoose iyo lidkooda** **10 dhibcood**

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| Cadaan | Aqoon | Wiil | Cir | Dhallaan |

1. Jaahilnimo ____________________
2. Dhul ____________________
3. Gabadh ____________________
4. Madow ____________________
5. Oday ____________________

**c. Ka warceli dhammaan weydiimahan soo socda** **10 dhibcood**

1. Sheeg labo ka mid ah dadka bir-ma geydada looyaqaan?

   ______________________________________________________________________

2. Waa kuma xayawaanka la dhaqdo ee uu codkiisu dannaaniga yahay?

   ______________________________________________________________________

3. Sheeg Labo ka mi ah noocyada guurka dhaqameedka Soomaalida?

   ______________________________________________________________________

4. Sheeg labo ka mid ah cabbir dhaqameedka soomaalida?

   ______________________________________________________________________

5. Sheeg labo ka mid ah waxyaabihii collaada kicin jirey Soomaalida dhexdeeda

   ______________________________________________________________________

***Dhammaad***



©PNEB,2020

SOM EXAMS

www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with qalinqaad.com